Sigtuna kommun

Somaliska

Wadajir

– Guri, dugsi iyo xannaano

Sawir: Rosie Alm

Hordhac

Dugsiyadayada xannaanada, waxaan ku dadaalnaa inaanu iskaashi aaminaad ku dhisan la yeelanno waalid kasta oo aanu isu aragno dhinacyo wada shaqayn leh iyo in xooga la saaro waxa u fiican ilmaha. Iskaashi si fiican u shaqaynaya wuxuu u baahanyahay in billowgaba ay caddahay waxa cid walba ay tahay mas'uuliyaddeedu, sida qaababka iskaashigu u ekaanayo iyo waxa dadku iska kaashanayaan. Si iskaashiga guriga iyo dugsiga xannaanada uu u noqdo midka ugu wanaagsan ee suurtogalka ah, waxaan soo saarnay dukumeentigan khuseeya dhammaan dugsiyada xannaanada carruurta ee degmada Sigtuna. Halkan ayaan ku caddeyneynaa waxyaabaha la filayo iyo shuruudaha aynu awoodno inaynu isku xirno – guri, dugsi iyo xannaano.

Carruur iyo arday aqoon leh

Dugsiyadayada xannaanada iyo kuwa hoose-dhexe waa inay aad u aaminsanaadaan in dhammaan carruurta iyo ardaydu doonayaan oo awoodaan inay guuleystaan. Waxaanu ka qaybgelinaa carruurta iyo ardayda waxbariddooda gaarka iyadoo loo marayo inay ka faa'ideystaan xiisahooda wax ogaansho, waxay xiiseeyaan, awoodahooda wax su'aalid. Waxaanu ku dhiirrigelinaa wax abuurid, geesinimo in lagu dhiirrado wixi aan la tijaabin oo ay wax kala bartaan waxna wada bartaan.

Macallimiinta doorkooda oo ah suurtogeliye

Cilmi-baaris iyo waayo aragnimo la tijaabiyay ayaa aasaas u ah xannaanada iyo dugsiyada hoose-dhexe. Waxaanu nahay wehel abuurka aqoonta, annagoo wadajirna dhanka carruurta iyo ardayda si loo wajaho adduun si joogto ah isu baddalaya. Waxaanu ammaan ku abuurnaa anagoo u shaqaynayna si macquul ah oo aanu si cad u ahaanno macallimiin hoggaamin leh.

Fursado abuuraya deggenaan waxbarasho

Carruurta iyo ardaydu waxay horumaraan oo wax ku bartaan wada shaqaynta dhexdooda ah, macallimiinta, bulshada iyo adduunka dijitaalka ah. Markaanu abuurno deggenaansho wax barid helitaankooda waxaanu markaas ku salaynay aragtida macallinimo, bulsho iyo qaab dhismeed ee deggenaanshaha wax baridda, si waxbarashadu ay u dhiirri-geliso dhammaan carruurta iyo ardayda wax bariddooda, xiisaha wax ogaansho iyo abuurid.

"Cid walba waa inay dareento ammaan iyo ku qanacsanaan gudaha dugsiga xannaanada"

Sawir: Mostphotos

Wada shaqaynta u dhaxaysa guriga iyo dugsiga

Dugsiga xannaanada mas'uuliyaddiisu waxay si cad ugu qeexantahay sharciga iskoolka iyo manhajka waxbarashada. Maamuluhu waa inuu hoggaamiyo oo qaybiyo hawsha dugsiga xannaanada. Waa maamulaha qofka gaaraya go'aanka ah sida dugsiga xannaanada loo nidaaminayo, sida kharashaadka loo qaybinayo iyo sida dugsiga xannaanada u shaqaynayo si loo gaaro hadafyada. Macallimiinta dugsiga xannaanada iyaguna waa inay mas'uul ka noqdaan waxbaridda. Waa macallinka dugsi xannaano qofka qorsheynaya, fulinaya ee la soconaya waxbarashada, si wadajir ah dhanka kooxda shaqada.

Dugsiga xannaanada waa inuu wada shaqayn la yeesho guriga si carruurta loo siiyo fursad ay ku horumaraan iyadoo ku salaysan awoodahooda. Dugsiga xannaanada waa inuu u caddeeyo carruurta iyo carruurta waalidkoodba nooca hadafyada waxbarashadan ay leedahay. Tani waxay fursad u tahay waalidka fursaddooda dhinaca raad ku yeelasho iyo fahamka dugsiga xannaanada waajibkiisa.

Filashooyinka aad naga fili karto annagayaga joogna dugsiga xannaanada

- Waxaan cid walba oo ku jirta hawshan ula dhaqanaa si leh tixgelin, saaxiibtinimo iyo ixtiraam, gudaha iyo bannaanka dugsiga xannaanada iyo baraha bulshada ee intarnatka.
- Waxaannu hubinnaa in adiga iyo ilmahaagu aad heshaan la qabsasho fiican dhanka dugsiga xannaanada oo waxaannu wada hadal joogto ah ka yeelanaynaa ilmaha horumarkiisa.
- Waxaannu waxbarashada u qorsheynaa si ku salaysan dukumentiga hoggaanka ah ee ansaxa ah iyo macallimiinta dugsiga xannaanada ee takhasuska leh qiimeyntooda.
- Waxaannu hubinnaa in carruurta oo dhan, iyadoo aan la eegayn awoodahooda, ay dareemaan ku qanacsanaan inay sameeyaan horumar, inay ka adkaadaan wixii ku adag iyo inay dareemaan inay faa'iido u yihiin howshani.
- Waxaannu annagoo dareensan danaynaa ciyaarta doorkeeda muhiimka ah ee carruurta waxbariddooda iyo horumar si loo dardar geliyo mala-awaalkooda, dareen wadaagid, xiriir iyo awoodooda in la wada shaqeeyo oo la maareeyo dhibaato.
- Waxaannu ku shaqaynaa mashruuc ku salaysan carruurta xiisahooda. Mashruucan waa lala socdaa oo la horumariyaa iyadoo leh taageerada dukumentiga waxbarasho.
- Waxaannu u shaqaynaa in la abuuro isla shaqeyn gudaha kooxdan iyo ammaan, farxad iyo deegaan amaan u ah ilmahaaga. Waxaanu u shaqaynaa qaab ka hortagid oo tallaabo qaadnaa mar walba oo laga shakiyo xad gudub ama takoorid oo carruurta ka caawinaa inay maareeyaan iska hor imaadyada ama dhibta kale.
- Haddii aanu ka shakino in ilmo ku jira khatar waxaa waajib nagu ah inaanu sameyno wargelin in laga welwelsanyahay.
- Waxaannu hubinaynaa in aad hesho warbixin ku saabsan waxa ku cusub dugsiga xannaanada iyadoo loo marayo marinada xiriirka ee dugsiga xannaanada.
- Waxaannu bixinaa casuumaad dhanka wada hadalka horumarka iyo isku imaatinyada waalidka.
- Waxaannu dhegaysanaynaa fikradahaaga iyo aragtiyahaaga ku saabsan dugsiga xannaanada hawshiisa dhanka wada hadal, madal kulan iyo dhanka warsashada sanadlaha ee loogu talogalay waalidka.

Filashooyinka aan kaa filayno adiga waalidka ah

- Waxaad dadka ku jira hawshan oo dhan ula dhaqmaysaa si leh tixgelin, saaxiibtinimo iyo ixtiraam, gudaha iyo bannaanka dugsiga xannaanada iyo baraha bulshada ee intarnatka.
- Waxaad taageeraysaa oo ixtiraamaysaa dugsiga xannaanada hawshiisa iyo qiimeyntiisa oo si wadajir ah ula shaqaynaysaa si loo helo waxa u fiican ilmaha.
- Ilmahaaga waxaa raad ku yeelanaya sida aad uga hadasho wixi ku saabsan dugsiga xannaanada. Iyadoo loo marayo qaab fiican in loo wajaho dugsiga xannaanada iyo waxbarashada waxaad ilmahaaga ka caawinaysaa in la dareemo aaminaada shaqaalaha iyo in la dareemo ammaan dhanka dugsiga xannaanada.
- Haddii ilmahaagu xanuunsanayo markaa waxaad samaynaysaa wargelinta bukaanka ee ilmahaaga xilliga subaxnimada sida waafaqsan nidaamyada dugsiga xannaanada. U daa in ilmuhu guriga joogo ilaa inta uu caafimaadayo.
- Waxaad mar walba xiriir la yeelanaysaa macallin ka hor inta aanad dhiibin ama soo kaxaysan ilmahaaga oo macallinka u sheegaysaa haddii ay dhacday wax raad ku yeelan kara ilmahaaga maalintiisa dhanka dugsiga xannaanada.
- Waxaad raacaysaa jadwalka wakhtiyada ilmahaaga ee dugsiga xannaanada oo wargelinaysaa wixii isbaddalo ah ee jiri kara sida ugu dhakhso badan ee aad u ogaato.
  Waxaad xitaa wargelinaysaa haddii cid kale ay soo kaxaynayso ilmahaaga.
- Waxaad qaadanaysaa warbixinta ku saabsan dugsiga xannaanada hawshiisa oo ahmiyad siinaysaa in aad ka qaybqaadato kulanka waalidka iyo xilliga warbixinta.
- Waxaad intii suurtagal ah ka qaybqaadanaysaa qiimeynta dugsiga xannaanada hawshiisa tusaale ahaan iyadoo aad ka jawaabayso wareysiga sanadlaha ah.

Golaha iyo marinada xiriirka iyo iskaashiga

Iskaashiga aanu la leenahay guriga waxaannu leenahay qaabab kala duwan dhanka warbixinta iyo wada hadalka. Adeegsiga kuwaas ayaa dugsiga xannaanada iyo gurigu si wadajir ah u qaadanayaan mas'uuliyadda iskaashiga danta ugu fiican u ah ilmaha.

"Macluumaadka cusub ee ka imanaya dugsiga xannaanada waxaa laga heli karaa aab-ka Unikum Familj"

Unikum

Waalidka carruur ugu jirto dugsiga xannaanada iyo dugsiga hoose-dhexe labadaba waxay fursad u haystaan inay carruurta oo dhan warbixintooda ka arkaan ab-ka Unikum Familj. Ujeeddadu waa in la abuuro muuqaalka ah waxa ka dhacaya dugsiga xannaanada guud ahaan, iyo wargelinta dhacdooyinka cusub ama isbaddalada.

Tempus

Adigaaga waalidka u ah ilmo dhigta dugsiga xannaanada waxaad gelinaysaa wakhtiyada ilmahaagu joogayo dhanka ab-ka Tempus Hemma. Waxaad xitaa taas ka samayn kartaa dhanka bogga internetka.

Golaha wada tashiga

Dugsi xannaano oo kasta waxaa ka jira gole ay waalidku ka helayaan fursad ah inay iskaashi nala sameeyaan annaga dhanka arrimaha waxbarashada. Waxay ka koobnaan doontaa waalidka, shaqaalaha wakiiladooda iyo hoggaanka dugsiga xannaanada. Golaha dugsiga xannaanada ee wada tashiga wuxuu bixiyaa casuumadda kulamo ugu yaraan hal mar teeram sanad-dugsiyeedkiiba, sidaas ayaa lagu eegaa arrimaha muhiimka u ah hawshan sida tusaale ahaan arrimaha hawleed iyo urur ahaan, hawsha tayada ee joogtada ah iyo qorshaha ka hortaga takooridda iyo dhaqan xad gudub ah. Ujeeddada golahan waa in dugsiga xannaanada uu fursad u helo in la soo qaato aragtiyaha waalidka tusaale ahaan ka hor go'aamada qaarkood. Golaha wada tashiga maaha waax go'aamin ama gole arrimo gaar ah oo khuseeya shaqaale, kooxo ama carruur lagaga hadlo. Dugsiga xannaanada ayaa mas'uul ka ah inuu jiro liiska waxa laga hadlayo ee kulamadaas iyo in la qoro xusuus qoryo.

Kulan waalid

Laba mar sanadkiiba ayaa dugsiga xannaanada bixiyaa casuumadda kulamada lala yeelanayo qoysaska. Kulankan wuxuu ku saabsanaan karaa dugsiga xannaanada hawshiisa iyo hadafkiisa, hawlo mashruuc oo socda iyo dugsiga xannaanada tayadiisa iyo horumarkiisa. Kulankan waxaa ku jiri kara xitaa tusaale ahaan bandhigyo ama hawlo qoys oo kale oo dugsiga xannaanada diyaariyo.

Wada hadalka horumarka

Ugu yaraan hal mar sanad-dugsiyeedkii ayaa dugsiga xannaanada kugu casuumayaa adigaaga ah waalidka wada hadal horumarka ku saabsan. Ujeeddada wada hadalada horumarka waa in adigu aad hesho muuqaalka waxbarashada ilmahaaga iyo dhanka mashruuca socda.

Kulamo

Dhanka xiriirka maalinlaha ee xilliga soo kaxaynta iyo keenidda ayaad ku sheegaysaa waxyaabaha khuseeya joogitaanka ilmahaaga guud ahaanba. Haddii ay jirto wax adiga ama macallimiinta dugsiga xannaanada aad doonaysaan inaad ka yeelataan wada hadal qoto dheer, markaas waxaad ballansanaysaan kulan gaar ah oo ku saabsan taas. Kulamada ama xiriiryada gaarka ah waxay dhacayaan inta lagu jiro shaqaalaha wakhtigooda shaqo ee caadiga ah.

Nidaamyada xilliga booqashada dugsiga xannaanada

Haddii aad doonaysid inaad ka qaybqaadato dugsiga xannaanada iyadoo ilmahaagu joogo hal maalin, waxaa si diiran laguugu soo dhawaynayaa inaad samayso sidaas. Haddii aad doonayso inaad qado ka cunto dugsiga xannaanada markaas waxaad bixinaysa lacag. Dhinaca dugsiga xannaanada waxaa joogi kara carruur iyo shaqaale leh aqoonsi qarsoon oo ammaankooda darteed waa muhiim in adigu qof weyn ahaan haddii aad joogto aagga dugsiga xannaanada inaad ixtiraamto waajibka sir qarinta oo aanad filim ama sawir ka qaadin carruurta ama shaqaalaha.

Wakhtiyada telafoonka

Xiriirka telefoonnada waxay dhacaan wakhtiyada dugsiga xannaanada uu furanyahay. Haddii qaybtan aanay ka jawaabin telafoonka markaas waxaannu ku mashquulsan nahay carruurta, sidaas darteed tijaabi in aad dib u wacdo wakhti yar kadib.

Welwel iyo aragtiyo

Haddii aad hayso su'aalo ama aragtiyo khuseeya xaaladda ilmahaaga ee dugsiga xannaanada waa inaad ugu horeyn la xiriirto shaqaalaha qaybta ilmaha maadaama iyagu ay sida ugu fiican u garanayaan ilmahaaga. Haddii aad dareento in welwel weli jiro wada hadalka kadib ama aad hayso aragtiyo khuseeya baaritaano, daraasado ama su'aalo dhanka hawshan iyo urur ahaan waa inaad la xiriirto maamulaha dugsiga xannaanada.

Haddii inkastoo wada hadal aad la yeelatay maamulaha aad weli dareemayso welwel ama u aragto in aanad helin jawaabta aragtidaada waxaad la xiriiraysaa degmada maamulkeeda carruurta iyo dhallaanka iyadoo loo marayo degmada bogeeda internetka halkaas oo aad raacayso xiriirka aadaya "Tyck till".

Adigaaga waalidka ah waxa kale oo aad la xiriiri kartaa degmada Sigtuna wakiilkeeda carruurta iyo ardayda (BEO). Wakiilka carruurta iyo ardayda waxay ka shaqeeyaan arrimaha khuseeya taageero gaar ah, xad gudubyada, ammaan yaraaday iyo ula dhaqanka si isku mid ah carrurta. BEO waxay mar walba wax ku saleeyaan ilmaha iyo ardayda xuquuqdooda oo si cad xoogga loo saarayo dantooda. Haddii adigu waalid ahaan aad dareento in xiriirka aad la leedahay iskoolka uu leeyahay daldaloolo waxaa BEO ay u shaqayn kartaa in la hubiyo in dadka oo dhan codkooda la dhagaysto. Waxaa xitaa lala xiriiri karaa BEO iyadoo aan magac la sheegin dhinaca arrimaha khuseeya hab la dhaqan xad gudub ah iyo takoorid dhinaca dugsiyada xannaanada iyo iskoolada. Macluumaadka xiriirka BEO waxaad ka helaysaa dhinaca degmada Sigtuna xarunteeda xiriirka ee telafoon lambar 08-591 260 00.

Dib ula soo xiriirid iyo jawaab

Haddii aad ii-mayl u dirto dugsiga xannaanada waxaad filan kartaa inaad jawaab hesho gudaha saddex maalmood oo shaqo. Haddii aad la xiriirto shaqaalaha degmada maamulkeeda waxaad isticmaalaysaa waxa lagu magacaabo "Tyck till" ee bogga internetka oo waxaad jawaab helaysaa gudaha shan maalmood oo shaqo.

Jihooyinka wadajirka ee loogu talogalay ammaanka iyo xasiloonida waxbarasho

Jihooyinkayaga wadajirka ah ayaa ansax ka ah dhammaan dugsiyada xannaanada ee degmada Sigtuna. Sharciyada ansaxa ka ah bulshada inteeda kale ayaa sidaas oo kale ansax ka ah iskoolka. Dembi sharciyan ah wuxuu keeni kara in dugsiga xannaanadu uu gudbiyo dacwo booliis.

Dulqaadasho la'aan dhanka la dhaqmid xad gudub ah iyo dhibaateyn

Dhacdo kasta oo ah la dhaqan xad gudub ah ama dhibaateyn waxay natiijadeedu noqonaysaa ficil celin ka timaada shaqaalaha dugsiga xannaanada. Arrin kasta waa lala soconayaa oo la maareynayaa.

Dadka aan shaqo ku lahayn ma loo oggola inay booqdaan dugsiga xannaanada

Dadka aan shaqo ku lahayn ma loo oggola inay joogaan aagga dugsiga xannaanada. Haddii aanu aragno qof aan haysan sabab uu ku joogo dugsiga xannaanada aaggiisa waanu la hadlaynaa oo u sheegaynaa qofkaas inuu meesha ka tago.

"Fadlan kaalay oo joog hal maalin dugsiga xannaanada"

Sawir: Scandinav/Johnér

La socodka hawshan

Degmada Sigtuna dugsiyadeeda xannaanada waxaannu leenahay hawl wadajir ah oo ah joogtaynta tayada. Tani micnaheedu waa in dugsiyada xannaanada oo dhan ay si joogto ah u qiimeeyaan oo u horumariyaan hawshan si waafaqsan nidaam wadajir ah. Ammaan, ku qanacsanaan iyo xasiloonida waxbarasho waxaa loola socdaa qaababka soo socda:

Wareysi loo diro waalidka iyo dadka haysta mas'uuliyadda sharci ee ilmaha

Xilliga gu'ga waxaannu fulinnaa wareysi waalid taas oo adigaaga haysta mas'uuliyadda sharci ee ilmo ku jira dugsiga xannaanada aad qiimeynayso hawshan tayadeeda. Taas waxaad kaga jawaabaysaa su'aalo ay ka mid yihiin ka qayb qaadashada, xiriirka iyo iskaashiga. Natiijada ka soo baxda wareysigan oo dhan ayaa la isu geynayaa oo la baarayaa dhanka dugsi xannaano kasta iyo degmo labadaba guud ahaan. Iyadoo ku salaysan baaritaanadaas ayaa dugsiyada xannaanada samaynayaan hawlo iyo tallaabooyin lagu qori doono qorshe hawleedka dugsiga xannaanada iyo qorshaha ka hortaga takoorid iyo dhaqan xad gudub ah.

Qorshaha ka hortaga takoorid iyo dhaqan xad gudub ah

Sanad walba waxay dugsiyada xannaanada cusboonaysiiyaan qorshayaashooda ka hortaga takoorid iyo dhaqan xad gudub ah. Waxaannu guud mar ku samaynaa qorshayaashaas si loo eego haddii ay u baahanyihiin in la sii fiicnaysiiyo ama la baddalo. Ujeeddada dugsiga xannaanada hawshiisu ammaanka waa mid ah hadaf ku jiheysan in la joojiyo, laga hortago oo la xannibo dhaqanka xad gudubka ah, takoorid iyo in qof la dhibo dhinaca dugsiga xannaanada. Qorshahan wuxuu ku baahsan yahay dhammaan hawlaha dugsiga xannaanada oo hab shaqo u ah dhammaan shaqaalaha jooga dugsiga xannaanada. Dugsi xannaano walba qorshihiisa waxaa la sameeyay marxalad imminka ah taas oo lagu baaro hawsha ammaanka ee dugsiga xannaanada laguna soo bandhigo tallaabooyin ah in uu sii fiicnaado.

Dib ula xiriirka waalidka

Waalid ahaan waxaad ogaanaysaa dugsiga xannaanada hawshiisa ammaanka iyo natiijada ka soo baxday baaritaanada wareysiyada xilliga kulanka waalidka deyr kasta. Hoggaanka (degmada) ayaa isu geynaysa xitaa natiijada tayo ee maamulka oo dhan oo ku jirta soo bandhiga sanadle ee tayada taas oo lagu daabaco degmada boggeeda internetka.

Waad ku mahadsantahay dadaalkaaga

Si wadajir ah ayaynu u kaalmayn karnaa dugsiyada hoose-dhexe iyo dugsiyada xannaanada si halkaas ay dadka waaweyn iyo carruurta ay labaduba u dareemaan ammaan, ku qanacsanaan iyo xasilooni waxbarasho.

Sawir: Plattform/Johnér

Daabacaad: Adeega daabacaadda Tryckservice Ängelholm, 2022 Qaab daabacaad: Matador Kommunikation AB

Sigtuna kommun

Degmada Sigtuna
Södergatan 20, 191 85 Märsta
Telafoon: 08-591 260 00
www.sigtuna.se

Buugan yar waxaa la helayaa xitaa isagoo ah luqaddaha soo socda: Ingiriisi, Urduu, Carabi, Soomaali iyo Fiinlaandiis. Qaybahan luqaddeed waxaa iyagoo dijitaal ah laga soo dejisanayaa bogayaga intarnatka, **www.sigtuna.se**.